

# Hordhaca **BSF**

BSF ama dugsiyada oo loo dhiso mustaqbalka waa barnaamijkii ugu waynaa ee abidkii qaranka laga hirgeliyay ee dugsi dhiska ahaa. Hadafka laga leeyahay barnaamijka waa in la dhiso ama la casriyeeyo dugsi kasta oo ku yaal England.

## Dugsiyada mustaqbalka – maanta

Degmada Haringey, wuxuu kawnsalku helay in ka badan £200m oo uu ku horumarinaayo dugsiyada sare ee ku yaal mandaqadda iyo taageerada ku saabsan habab cusub oo wax loo dhigo waxna loo barto. Habaynta dugsiyadayadu way bilaabantay iyo weliba inaannu samayno fasallo casri ah, kombuyuutarro iyo qalabkale oo la siiyay dugsiyadii jiray, barnaamijku wuxuu samayn doonaa dugsi cusub, dugsi sare ee Heartlands.

Isbeddelladaas waxa looga dan leeyahay in la hagaajiyo fursadaha nolol ee carruurta iyo dhallinta ku nool mandaqadda si sare loogu soo qaado heerarka waxbarashada ee degmada.

Marka dhankaas laga eego barnaamijyada BSF waxay ku saabsanyihiin arrimo ka xeel dheer dhismayaal – waxay ku saabsantahay sidii loo beddeli lahaa oo loo habayn lahaa sida aynu wax u barno dhallinta, iyadoo la dhiirrigelinayo isbeddel iyo dibu soo noolynta dhamaan dugsiyada iyo beeshaba.

Haddii aad rabto inaad faallo ka bixiso barnaamijka ama aad cid waydiiso su'aalo ku saabsan barnaamijka fadlan email u soo dir:

[bsf@haringey.gov.uk](mailto:bsf@haringey.gov.uk)